



WAXAA AAN HADDA DEJINEYNAA QORSHEYAASHA HAWLAHA XILIGA XAGAAGA EE DUGSIYADA XANAANADA CARRUURTA

Waa sidee fasaxaagu xilliga xagaaga?

Dugsiga xanaanada carruurta muddada lagu jiro todobaadyafa 24-27, 32-34

Waxaa ay hadda dugsiyada xanaanadu ay bilaabayaan in ay qorsheeyaan hawlaha ay qaban doonaan xiliga xagaaa. Todobaadayada xiliga xagaaga ee 24-27, 32-34 dugsiyada xanaanadu iyaga ayaa iskood u qorsheysta hawlhooda iyo tirada shaqaalaha ay u baahanyihiin. Wakhtiyada uu ilamhaagu imanayo dugsiga xanaanada muddada lagu jiro todobaadyadaas waxaa lagu qorayaa jadwalka ku yaalaa warqadan xageeda hoose isla markaana waa in aad wargeliso dugsiga xanaanada ugu danbeyn 6/5.



Haddii aad haysato ilmo bilaabayaa fasalka hordhaca ee dugsiyada waxbarashada bisha ogosto, waxaa uu ilmahaagu booskiisa dugsiga xanaanada sii joogi karaa ilaa iyo 2-da bisha ogosto 2013-ka (waa haddii aanad wargelin ama aanad ogeysiin in ilmahaagu dhameynayo dugsiga xanaanada)

Hawlaha xiliga xagaaga muddada lagu jiro todobaadyada 28-31

Macluumaadka saxa ah ee qorsheynta

Muddada lagu jiro todobaadyada 28–31 waxaa lagu marti qaadi doonaa carruuraha ay labadooda waalidba shaqeeyaan. Todobaadyadaas carruurta intooda badan waa fasax sidaa awaadee ma furna dhamaan dugsiyada xanaanadu. Haddii ilmahaagu u baahanyahay xanaaneyn muddada lagu jiro todobaadyada 28–31 waxaa sharci ah in uu ilmahaagu tago dugsiga xanaano oo kale oo aan aheyn kii uu sida caadiga uu dhigan jirey. Waxaa meheradaha intooda badan ka shaqeeya shaqaale ku meel gaadh ah.

Hawlaha xiliga xagaaga waxaa lagu qorsheeyaa xarun dhexe oo lagu magacaabo xafiiska dugsiyada xanaanada. Hadaba si xfiiska dugsiyada xanaanadu u dajin karo qorshayaal wanaagsan muddada lagu jiro todobaadyadaas waxaa aad u muhiima in aan helno macluumaad sax ah oo ay waalidiintu noo soo gudbiyaan. Waxaa aan hawlah u qorsheynaa anaga oo ka duuleyna wakhtiyada aad na soo wargaliso ka waalid ahaan.

Is diiwaan galinta dijitaalka ee ku aadan hawlaha xiliga xagaaga

Waxaa ka waalid ahaan lagaa rabaa in aad keeto jadwalka ilmahaaga ee



todobaadyada 28–31 adiga oo adeegsnaya adeega elektarooniga (e-tjänst) ee bogga internetka.

> Fadlak ku xeree jadwalka www.uddevalla.se/sommarverksamhet

Cinwaanka bogga internetka ee kor ku xusan waxaa aad ka heleysaa link kuu sii gudbinya adeega elektarooniga ee lagu magacaabo (e tjänstan) iyo waliba macluumaad kale. Ugu danbeyn 6/5 ayaan rabnaa in aad keento codsigaaga. Xitaa haddii aad hayso jadwal ku meel gaadh ah waxaa sidoo kale aan u baahanahay in aad noo keento macluumaadkaaga si aan u qorsheysan karno lookalada la isticmaali doono iyo shaqaalaha labadaba.

Haddii uu jadwalkaagu isbedelo ka dib marka aad codisaga ka sameeyso adeega elektarooniga ah (tjänsten), waxaa aad fusad u haysataa in aad ku xereyn karto isbedelka ku yimid jadwalakaaga bogga www.uddevalla.se/sommarverksamhet muddada u dhaxeysa 1^{da} bisha maajo iyo 9^{ka} bisha juunyo.

Waxaa loo baahanyahay in aad keento warqada cadeyneysa in aad shaqeyso- /cadeyn in aad waxbarato

Waalidiinta waxaa looga baahanyahay in ay keenaan warqad cadeyn ah oo ah in aad shaqeyso ama aad waxbarato taas oo aad ku soo lifaaqeyso codsiga Warqada shaqo oo cadeyneysa inta aad shaqeyso, nooca shaqada aad shaqeyso iyo waliba taariikhda aad bilaabeyso shaqada. Warqada cadeyta waxbarasha waxaa loo baahanyahay in lagu muujiyo cadadka iyo xawaaraha waxbarashada.

Fadlan ku soo dir waqada cadeynta shaqada ama waxbarashada iyada oo diijitaal ah bagga intetka ee www.uddevalla.se/intyg

TAARIKHAHA MUHIIMKA AH

UGU DANBEY 6-DA BISHA MAAJO

- Fadla Keen dugsiga xanaanada ee uu ilmahaagu dhigto foomka jadwalka ee khuseeya todobaadyada 24-27, 32-34 till din förskola

- Ka codso haddii ay jirto baahi xanaano todobaadya 28-31 bogga www.uddevalla.se/sommarverksamhet

1-DA BISHA MAAJO-9-KA BISHA JUUNYO

- Haddii aad codsatay in ay jirto baahi xanaano todobaadyada 28-31 markaana aad rabto in aad bedesho jadwala waxaa aad sameyn kartaa muddada u dhaxeysa 1-da bisha maajo iyo 9-ka bisha juunyo

11-KA JUUNYO + 18-KA JUUNYO

- Bandhig furag oo ku saabsan dugasiyada xanaanada ee xilga xagaaga inta u dhaxeysa saacada 18–20. Dusiga xanaanada ee lagu qaban doono bandhiga dib baa la iska ogeysiin doonaa.





Foomka loogu talogaley todobaadyada xiliga xagaaga ee 24-27, 32-34

Magaca ilmaha/caruurta:

Dugsiga xanaanada:

Kooxda:

Todobaadka Vecka	Isniin Måndag	Talaado/salaaso Tisdag	Arbaco Onsdag	Khamiis Torsdag	Jimce Fredag
24					
25					Midsommar- afton
26					
27					
28-31	Waxaan soo codsadey xanaaney todobaadya 28-31 aniga oo adeegsanaya adeega elegtarooniga ah (e-fjänst)  Ilmahaygu uma baahna wax xanaano ah todobaadyada 28-31 				
32					
33					
34					

Fadlan gee foomka jadwalka dugsiga xanaanada ee uu ilmahaagu dhigto ugu danbeyn 6/5